

# Ka fogee baytariiyada badhanka ilmahaaga

Haddii ilmahaagu liqo badhanka bateriga, wuuxu ku dhagi karaa dhuunta. Waxay ku guban kartaa ilaa iyo Halbowlayaasha waaweyn oo si xun u waxyeeleeya ama xitaa dili karaa. Tani waxay u dhici kartaa si degdeg ah.

Carruurta da'doodu u dhaxayso 6 bilood ilaa 4 ½ sano ayaa ah kuwa ugu khatarta badan.



## Waa kuwee baytariiyada ugu khatarta badan?

Bayteriyada Lithium coin cell waxyar bay ka weyn yihiin 5 pences. Way weyn yihiin inay ku dhegganaadaan oo way ku filan yihiin inay dilaan.

Badhanka baytariiyada yaryar wali waxay keeni karaan waxyeelo, gaar ahaan haddii ay cusub yihiin.

## Aawey?

Ilmahaagu waxa uu ka heli karaa baytariiyada badhanka waxyaalaha ay ka midka yihiin:

- ✎ xakamayn tar oo meel fog ah
- ✎ silsilada furaha baabuurka ama furayaasha raadiyaha
- ✎ kaararka muusiga iyo buugaagta
- ✎ alaabta lagu ciyaaro ee iftiimaya iyo alaab cusub
- ✎ nalalka habeenkii
- ✎ miisaanada casriga ah
- ✎ heerkul cabiraha
- ✎ alaabtii hore ee sanduuqa agabka lagu ciyaaro

Carruurta waxa kale oo laga yaabaa inay helaan baytariiyada firaaqada ah ee ku kaydsan meel ay gaadhi karaan ama ka soo dhacay baakadda.

Xataa baytariiyada 'fidsan' ee la isticmaalo ayaa weli haya lacag ku filan oo khatar ah.

## Gurigaaga hubi

- ✎ Ka raadi agagaarka gurigaaga si aad u hesho baytariiyada badhanka
- ✎ Alaabta si fiican uga ilaali meel aanay gaadhin ilmahaaga haddii qaybta batteriga aan la hubin
- ✎ Ku kaydi badelka baytariiyada iyo kuwa 'fidsan' sidoo kale meel aan la gaadhin
- ✎ Ka digtoonow gorgortanka suuqyada internetka ama dukaamada qiimo dhimista. Waxa laga yaabaa inay haystaan baytariiyada badhanka ee ilmahaagu si fudud ku heli karo

## Ilmahaagu mid miyuu liqay?

- ✎ Ha daahinin Si toos ah ugu qaad A&E ama wac 999 ambalaas.
- ✎ U sheeg dhakhtarka inaad u malaynayso in ilmahaagu liqay baytari badhanka.
- ✎ Haddii aad haysato baakadaha bateriga ama alaabtii uu batarigu ka soo baxay, qaado.
- ✎ Ha u oggolaan inay wax cunaan ama cabbaan hana ku xanuusanin.

Waxaa laga yaabaa inay jiraan astaamo yar. Markaa ku kalsoonow dareenkaaga.

 [capt.org.uk/button-batteries](https://www.capt.org.uk/button-batteries)

 @ChildAccidentPreventionTrust

  
child accident  
prevention trust